

# Ra'yi dhiibo oo naga caawi horumarinta Nidaamkayaga Sinnaanta

Guddiga gaarka ah ee Golaha Qaran ee Wales (National Assembly for Wales Commission) waxay soo baarayaan mudnaanta sinnaanta ee ay ku qaabaynayaan Nidaamkooda Sinnaanta ee Kelida ah iyo Qorshahooda Waxqabadka. Qorshahayagu waxuu diirrada saari doonaa sifooyinka sinnaanta ee soo socda: da'da, naafonimada, jinsiga/aqoonsiga jinsiga, jinsiyadda, diinta/iimaanka iyo jihada galmada.

Waxuu Nidaamku wax ka qaban doonaa Guddiga gaarka ah ee Golaha kaalintiisa loo-shaqeeye iyo urur adeegyo siiya Xubnaha Golaha lana macaamila shacabka Wales. Waxaannu aaminsan nahay in ay mudnaan noo tahay in aannu kooxaha laga tiro badan yahay u wanaajinno isticmaalka Golaha. Waxaannu taas uga jeednaa helitaanka warbixinta, ka qaybqaadashada waxqabadyada Golaha, helitaanka fursadaha suurogalka ah ee shaqada iyo isticmaalka dhismeyaashayada sida Senedd-ka.

Waxaad laga yaabaa in aad fikrado ka qabto sida adiga isticmaalka laguugu wanaajin karo.

Waxaannu rabnaa in aannu ogaanno ra'yiga aad ka qabto arrimaha soo socda iyo sida ay u saamayn karaan laftigaaga, qoyskaaga/saaxiibbadaada ama xubnaha bulshadaada. **Fadlan la wadaag qoyskaaga, saaxiibbadaada iyo dadka kalee aad u aragto in ay xiisayn karaan.**

**Haddii aad rabto in aad e-mail toos faallooyinka ugu soo celiso fadlan Kooxda Sinnaanta (Equalities Team) kala xiriir [equalities.team@wales.gsi.gov.uk](mailto:equalities.team@wales.gsi.gov.uk) ama haddii aad ka jeceshahay, Holly ama Ross (Kooxda Sinnaanta) ka soo wac lambarka 029 2089 8204. Taariikhda kama dambaysta u ah jawaabuhu waa 29ka August 2008da.**

Fadlan noo sheeg ra'yiga aad ka qabto arrimaha soo socda

## Helitaanka warbixinta

- Ma garanaysaa sida aad u heli karto warbixinta ku saabsan Golaha Qaran ee Wales?
- Ma isticmaashay boggaayaga internetka ([www.assemblywales.org](http://www.assemblywales.org))? Sidee ayuu ahaa? Ma fududaa isticmaalkiisu? Sidee loo wanaajin karaa?
- Ma habboon tahay in aannu warbixin ku soo saarno luqado aan ahayn Ingiriisi iyo Welsh?
- Ma garanaysaa sida aad ula xiriiri karto Xubintaada Golaha (Assembly Member)?

## Helitaanka fursadaha shaqada

- Si joogto ah ma u aragtaa xayaysiisyada ku saabsan shaqooyinkayaga?
- Halkeed jeclaan lahayd in iyaga lagu soo xayaysiiyo?
- Maxaa kugu dhiirrigelin kara in aad annaga shaqo naga codsato?
- Maxaa kaa niyadjabin kara in aad codsato?

## Ka qaybqaadashada waxqabadyada

- Ma og tahay in aad daawan karto kulannada Golaha? Taas ma samaysay? Siday kula ahayd?
- Ma og tahay in kulannada Golaha laga daawan karo internetka? Ma garanaysaa halkaad taas u tagi karto?
- Ma ka war haysaa nidaamka codsiyada wadajirka ah ee Golaha, kaasoo ay xubnaha shacabku Golaha ku weydiisan karaan in uu ka fiirsado arrin gaar ah?

## Isticmaalka dhismeyaashayada

- Weligaa ma booqatay Senedd-ka ku yaalla Cardiff Bay? Dhismaha ayaad indha-indhayn kartaa, waxaad daawan kartaa waxqabadyada ama waxaad u soo geli kartaa ku soo leexasho iyo si aad u booqato makhaayadda.
- Haddii aad booqatay Senedd-ka, siduu kula ahaa? Maxaa lagu wanaajin karaa?

Ma jiraa wax kaloo kula habboon in aannu ogaanno?

Waxaad kuraasi ka diyaarsan kartaa kulannada Loo dhan yahay ama Guddiyeed ee Senedd-ka ka dhaca, ama indha-indhayn ku diyaarso adigoo soo wacaya khadka diyaarsashada ee ah 0845 010 5500, telefoonka qoraalka (textphone) 0845 010 5678

or email u soo diraya: [assembly.bookings@Wales.gsi.gov.uk](mailto:assembly.bookings@Wales.gsi.gov.uk)

ama warqad u soo diraya: Assembly Booking Service, National Assembly for Wales, North Wales Visitor Centre, Princes Park, Princes Drive, Colwyn Bay, Conwy LL29 8PL